

Goorma Ayay Tahay In Ilmahaygu Guriga Joogo?

Calaamadaha Ardayga / Jirada la Sheegay	Ardaygu Wuu Iman Karaa Dugsiga Marka
Qandho ka badan 100.5 darajo (oo afka ah).	Heerkul ka hooseeya 100 darajo (oo afka ah) Ugu Yaraan 24 saac iyada oo aan isticmaalin Tylenol ama dawo kale oo qandhada yareynaysa.
Finan ama finan leh qandho – oo cusub ama dhakhso u yimid.	Marka finanku tagaan. Oggalaansho qoran ama teleefonka ah oo dhakhtarku siiyay kalkaalisada dugsiga.
Dheecaan midab leh oo ah idhaha; dheecaan cawlan / cagaar ah oo ah sanko oo leh qandho ka badan 100.5 darajo; nabaro maqaarka ah oo dheecaan leh (biyo ama malax ku jirto)	Waa in dheecaanku tagay ama waa in ardaygu uu qaatay antibiyootiko mudo ah 24 saac waana inuu haysto oggalaansho qoran ama teleefonka ah oo dhakhtarku siiyay kalkaalisada dugsiga.
Matag	Waa in aanu calaamado lahayn 24 saac
Shuban: 3 saxaro oo furfuran ama biyo-biyo ah gudaha hal maalin.	Waa in aanu calaamado lahayn 24 saac
Qufac: Culus, leh sanqadh weyn, cabudh, ama leh xaako midab leh.	Waa in aanu calaamado lahayn ama waa in ardaygu uu qaatay antibiyootiko mudo ah 24 saac waana inuu haysto oggalaansho qoran ama teleefonka ah oo dhakhtarku siiyay kalkaalisada dugsiga. Antibiyootikadu waxba kama tarto cudurada uu keenay fayras. Marka antibiyootikada laguugu qoray cudur ama caabuuq bakteeriyo keentay, dhamaan dawooyinka u qaado sida lagu sheegay ilaa ay ka dhamaadaan.
Saxaro cad, midab ciid leh, ama dhiig leh	Oggalaansho qoran / teleefonka ah oo dhakhtarku siiyay kalkaalisada dugsiga
Midabka maqaarka iyo/ama indhaha oo ah jaale ama hurdi	Oggalaansho qoran / teleefonka ah oo dhakhtarku siiyay kalkaalisada dugsiga
Kaadi cawlan ama dhiig leh	Oggalaansho qoran / teleefonka ah oo dhakhtarku siiyay kalkaalisada dugsiga
Qoor adag ama madax-xanuun leh qandho	Waa in aanu lahayn calaamado ama oggalaansho qoran / teleefonka ah oo dhakhtarku siiyay kalkaalisada dugsiga
Ilmo si aan caadi ahayn u hurda, caajis leh, ama xanaaq badan	Waa in aanu lahayn calaamado ama oggalaansho qoran / teleefonka ah oo dhakhtarku siiyay kalkaalisada dugsiga
Bakteeriyada Cunaha (Strep throat) oo uu sheegay bixiye daryeel caafimaad	Waa inuu qaatay antibiyootiko mudo ah 24 saac waana inuu haysto oggalaansho qoran / teleefonka ah oo dhakhtarku siiyay kalkaalisada dugsiga. Haddii aan la siin antibiyootiko, wac kalkaalisada dugsiga ka hor inta aanad ilmaha u dirin dugsiga.
Ka dib cudur ah laba todobaad ama ka badan, qalitaan, ama isbeddel kale oo ah xaaladda caafimaad.	Waa in kalkaalisada dugsiga la siiyo fariimo qoraal ah oo ka yimid dhakhtarka iyo/ama waalidka oo ku saabsan daweyn ama baahiyo caafimaad oo gaar ah. Wac kalkaalisada dugsiga ka hor inta aanad ardayga u dirin dugsiga.